

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Sidee baan ku garan karaa warka beenta ah?

Warka beenta ah waxaa inta badan la isku khaldaa runta iyo beenta. Badanaa waa warar, fiidiyowyaal, sawirro ama kuwo intaba ka kooban oo la isugu gudbiyo baraha bulshada sida WhatsApp-ka, Facebook, Twitter, Instagram iyo kuwo kale.



**Macluumaadka aad helayso si wanaagsan isaga hubi inta aadan cid kale la wadaagin.**

Akhbaarta, xogaha la khalday ama la qallociyey, wararka iyo waxyaabaha beenta ah, waa dhibaato aad u culus oo ka taagan caalamka oo idil ee ka digtoonow.

Qof kasta oo naga mid ah waa inuu ku dadaalaa garashadooda, kahortaggooda iyo joojintoodaba!

**Ka qeybqaado joojinta wararka beenta ah!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Waa maxay sababta loo sameeyo wararka beenta ah?

❗ Ujeedooyinka wararka beenta ama marinhabaabinta ah loo sameeyo waxaa ka mid ah:

- in dhaqaale lagu raadinayo ama lagu uruursanayo
- in wax lagu xayeysiinayo ama lagu iibinayo
- in la rabo in wax lagu sumcad dilo
- in wax run ah lagu beeninayo
- in la rabo in shaki iyo fowdo lagu abuuro
- in awood lagu raadinayo ama fikrad gaar ah lagu fidinayo

& ujeedooyin kale oo badan.

**Ka feker ujeedada farriinta warka ama xogtu xambaarsan tahay.**

ℹ Wararka beenta ah waxaa lagu faafiyaa baraha bulshada, aaladaha kala duwan ee warbaahinta waxayna ku baahaan si degdeg ah. Wararka beenta ah waxaa loo sameeyaa qaab xirfadeysan oo ay dareenka qofka ku soo jiitaan.

Ka digtoonow inaad cid kale la wadaagto war lagula soo wadaagay oodan iska hubinin run ahaantiisa!

**Iska hubi run ahaanta warka inta aadan qof kale u dirin!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Yaa faafiya wararka iyo xogaha beenta ah?

Wararka iyo xogaha beenta ah waxaa soosaara tusaale ahaan dad, hay'ado, shirkado ama wadamo si qorshaysan u abaabulan. Ujeedada laga leeyahay waxay noqon kartaa in dano gaar ah lagu gaaro sida in dadka lagu marinhabaabiyo, in dhaqaale ama awood lagu helo ama in wax lagu sumcad dilo, in jaha-wareer lagu abuuro ama in shaki lagu galiyo war ama akhbaar run ah.

## Meelo kala duwan ayaa soo saara wararka iyo waxyaabaha beenta ah.

Waxaa suuragal ah inaad aragto video, sawir ama qoraal wareegaya baraha bulshada ama aaladaha farriimaha la isugu diro, kuwaas oo ay adagtahay in la raadraaco.

Calaamadaha wararka beenta ah lagu garto waxaa ka mid ah inay adagtahay helida cida ka dambeysa!

**Raadraac ku samee xogaha oo hubi run ahaantooda!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Sidee bay wararka iyo xogaha beenta ah ku faafaan?

Wararka iyo xogaha khaldan ama beenta ah waxay si dhakhso leh ugu faafaan baraha bulshada sida Facebook-ga, Twitter-ka, Instagram-ka iyo WhatsApp-ka. Dadka isticmaala ayaa si dhaqso leh isugu gudbiya, iyadoo badanaa qofku uusan hubinin warka uu gudbinayo inuu run yahay iyo in kale ama qofku uusan sameynin wax raadraac ah.

## Xogaha iyo wararka beenta ah si dhakhso ah ayey ku faafaan.

Sababaha keena faafida degdegga ah ee wararka beenta ah waxaa ka mid ah iyadoo qofku uusan iska hubinin xaqiiqo ahaantooda horeyna kala wadaago dadka kale.

Barashada iyo ka digtoonaanta, wararka beenta ah waa masuuliyad ina wada saaran. Adigu qeyb ha ka noqonin, saaxiibkaana uga dig!

**Ka digtoonow faafinta akhbaar aan la raadraaci karin!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Waa maxay sababta ay wararka beenta ah si dhakhso leh ugu faafaan?

Guud ahaan marka laga hadlayo wararka ama xogaha meelaha kala duwan soosaaraan, ujeedada laga leeyahay waa in qofka dareenkiisa ay soo jiitaan iyo in dad badana ay akhristaan ama daawadaan. Badanaa wararka ama xogaha beenta ah waa kuwo si xirfadeysan loo sameeyey looguna talagalay inay dareenka dadka kiciyaan si qofku saaxiibo badan ula wadaago.

**Wararka beenta ah waa kuwo lagu kicinayo shucuurta qofka.**

Wararka beenta ah waa kuwo ay adagtahay inaad ka garato kuwa saxda ah. Waa kuwo si xirfadeysan loo soo diyaariyey si dareenka dadka loo kiciyo si loo sii faafiyo.

Ka digtoonow xogaha beenta ah, u fiirso cida soosaartay, hubi in la raadraaci karo iyo in kale!

**Mar walba warka aad hesho qiimeyn ku samee oo hubi!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Dhibaatooyin noocee ah ayey keeni karaan wararka ama xogaha beenta ah?

❗ Wararka ama xogaha beenta ah waxay gudbiyaan akhbaar khaldan, taasoo keeni karta xaalado khatar ah. Tusaale wararka beenta ah ee ku saabsan arrimaha caafimaadka, koronaha ama tallaalka waxay sababi karaan khatar caafimaad oo weyn. Waxay abuuri karaan shaki iyo hubanti la'aan, sidoo kale kuwa khuseeya doorashooyinka waxay sababi karaan qalalaaso iyo fowdo.

## Xogaha beenta ah waxay keeni karaan dhibaatooyin waaweyn.

ℹ Wararka beenta ah (fake news) waxay sababaan dhibaatooyin bulsho, siyaasadeed, caafimaad, marinhabaabin iyo hubanti la'aan. Wararka saxda ah ka raadso ilaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo.

✋ Ka digtoonow khatarta wararka iyo xogaha beenta ah!

**Akhbaaraadka ka raadso ilaha lagu kalsoonaan karo!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Sidee ayey wararka beenta ah u saameeyaan ilaha warbaahineed ee lagu kalsoonaan karo?

Wararka beenta ah waa kuwo hoos udhigaya kalsoonida iyo aaminaadda ilaha warbaahineed ee lagu kalsoonaan karo. Tusaale farriimaha saxda ah ee la xiriira arrimaha caafimaadka marka si khaldan loo fasiro ama been laga sheego waxay abuuraan kalsoonidarro baahsan, fowdo iyo khatar weyn.

## Wararka iyo xogaha beenta ah waxay horseedaan hubanti la'aan.

Saameynta wararka beenta ah ay ku leeyihiin wararka ama xogaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo aad ayey u sareysaa.

Ogow xogaha beenta ah waxay abuuraan kalsoonidarro iyo jaha-wareer, marar badanna waxay shaki weyn galiyaan wararka saxda ah!

**Ku xirnow warbaahin lagu kalsoonaan karo!**

# AQOONSO WARARKA IYO XOGAHA BEENTA AH!

## Sidee ayaan saameyn ugu yeelan karaa ka hortagga faafista wararka ama xogaha beenta ah?

Aqoonsiga iyo ka hortagga wararka iyo xogaha beenta ah waa mas'uuliyad saaran qof walba oo inaga mid ah. Haddaba adigu ha gudbinin war ama xog aadan akhrisan dhammaanteed, isla markaasna aan la raadraaci karin. Akhbaarta iyo xogaha aad hesho ka hubi ilaha kale ee warbaahinta.

**Wixii macluumaad dheeri ah kala soo xiriir ururka Suomi-Somalia Seura www.suomisomaliaseura.fi**

Soosaarista: Mashruuca Caawinaad

## Ka feker laba goor inta aadan xogta ama farriinta sii gudbinin!

**Ururada kawada shaqeeyey soosaarista macluumaadkan:**

https://suomisomaliaseura.fi/
https://mediakasvatus.fi/
https://vikes.fi/

**Ilo-wareedyada lagu kalsoonaan karo:**

https://thl.fi/fi/
https://www.who.int/
https://stm.fi/
https://valtioneuvosto.fi/
https://yle.fi/
https://www.hs.fi/

**Macluumaad dheeri ah:**

https://www.mediataitokoulu.fi/
https://faktabaari.fi/